## BOGAGEYGA

# SIDAAN AYAAD SAMEYNEYSAA SI AAD U SAMEYSATO DALAB JOOGTO AH EE CAAWINAADA DHAQAALAHA ADIGOO ISTICMAALAAYA ADEEGA CUSUB EE ELEKTAROONIGA AAN KA BILAWNAY BOGGEENA SHABAKADA CAALAMIGA AH

**Laga bilaabo gu'ga 2020 qofka xiriir la leh gacanhayaha cayrta Lindesberg wuxuu fursad u leeyaha inuu dalabkiisa ka sii wato adeega cusub ee elektarooniga ah**

Waxaad u baahantahay aqoonsiga elektarooniga ah, oo ah nooca aqoonsiga bankiga ama aqoonsiga bangiga moobiilka si aad u sameysato dalabkaaga caawinaada dhaqaalaha. Aqoonsiga bankiga waa aqoonsigaaga elektarooniga ah kaa soo u xaqiijinaaya nidaamka kombiyuutarka in qofka adiga aad tahay iyo in qof sax ah uu arinta furi karo









Haddii uu qalad ku yimaado adeega elektarooniga ah – la xiriir gacanhayahaaga ama soo wac xiriirinta degmada oo u sharax dhibaatada waxay tahay, 0581-810 00 vx.

**Si aad u isticmaasho Adeega lektarooniga waxaad u baahantahay inaa haysatid kombiyuutar, telefoon casri ah ama looxada internetka iyo aqoonsiga elektarooniga**

**Haddii aad tihiin laba codsade labadiinaba waa inaa haysataan aqoonsiga elektarooniga ah si aad u saxiixdaan dalabka**

**Intaa ka dib waxaa arrintaada kala soconkartaa boggaga shabakada**

Xafiiska maamulka bulshada ee Lindesberg
0581-810 00 xiriirinta

LINDESBERGS KOMMUN

### Sidaan ayaad sameyneysaa:

Markaad boggeyga u gasho aqoonsiga bangiga ama aqoonsiga bangiga moobiilka waxaad geleysaa koow bogga bilaawga ah. Halkaasoo ay ku jiraan macluumaad la xiriira dalabka caawinaada dhaqaalaha. Warbixintaada waa tan uu gacanhayagaaga cayrta kuu diiwaangeliyay. (qofka kula dalbanaayo ma arkaayo warbixintaada waayo waxaa loogu talo galay codsadaha koowaad keliya).




Riix meesha ay ku qoran tahay sök si aad u bilawdid codsigaaga

### Codsiga

Hadda waxaad bilaabeysaa inaa buuxisid dalabka. Si aad ugu sii gudubtid bogga labaad ee dalabka waxaad riixdaa **Ansök.**




**Meelaha la buuxinaayo ee ku taalo calaamada * waa qasab boosaskaas in la buuxiyo.**

Codsade

La codsade

Caruur

Qor nambarka telefoonka mobiilka ama cinwaanka boostada elektarooniga ah. Halkaas ayaa laguugu soo sheegi doonaa markii arrintaada wax ku soo kordhaan

Warbixinta ku buuxi haddii la codsade uu jiro.

Warbixinta ku buuxi haddii aad caruur leedahay ama caruurtaada ku soo booqato.

**Soo deji waraaqaha lagaa rabo**

Meelaha qaar waxaa qasab ah inaa gelisid waraaqaha la rabo.

**Telefoonka mobiilka iyo looxada internetka**

Waxaad riixeysaa ”ladda upp” waxaad sawireysaa rasiidka, qaansheegadka, waraaqda mushaarka, waraaqda koontada ama waraaqihii kaloo lagaaga baahdo.

**Kombiyuutarka dhexdiisa – soo deji waraaqaha lagaa rabo**

Kombiyuutarka ku xafid qaansheegadka elektarooniga ah ama waraaqaha koontada, waxaad riixdaa ”Ladda upp” ka dibna waraaqaha meesha ka soo degso.

**Noocyada galalka wax lagu soo degsan karo waa:** gif, png, jpg, jpeg, pfd, txt.

markii aad dhameysid waxaad saxeysaa ☐ waa soo dejiyay dhamaan waraaqihii layga baahnaa meesha kuk xigto ayaan galaayaa waxaad riixeysaa Nästa.




**Guriga** — Ku buuxi warbixinta guriga aad degantahay

**Warbixinta koontada** — Soo degso warbixinada koontooyinka bangiga oo dhan

**Dakhliga** — dooro dakhliga, soo degso,kuk buuxi lacagta iyo taariikhda, waxaad dooran kartaa inaa soo dejisid waraaqo badan

**Qarashka** — dooro qarashka, soo degso, ku buuxi lacagta iyo taariikhda, waxaa dooran kartaa inaa soo dejisid waraaqo badan

**Hanti** — haddii aad hanti leedahay (sida wax leh qiime dhaqaale, tusaale ahaan gaari, mooto, guri ama hanti ku leedahay waddan kale) ku buuxi inta qiimihiisa la eg yahay

LINDESBERGS KOMMUN

**Qarash kale** — ku buuxi haddii aad ka dalbatay qarash kale ama kaalmo hay'adaha dowliga ama ururada aadna go'aan ka sugeysid

**Hawl qabad** — Halkaan waxaad ku qoreysaa nooca hawsha aad hayso – tusaale. shaqo, xannuun ku qoran, ku qoran AME ama waxyaabo kale

**Wax dheeri ah** — Halkaan waxaad ku qoreysaa waxyaabaha aad is leedahay waa muhiim inaa noo sheegtidom

Haddii aad u baahato inaa codsigaaga joojisid mar dambe waa la noqon kartaa – waxaad sameyneysaa inaa ka baxdid boggaaga. Markaa rabtid inaa codsigaaga sii wadatid waa geleysaa waxaadna taabaneysaa sii wad. Codsiga waxaa uu ku jiraayuaa saddex maalmood, ka dibna waa inuu qofka dib u soo bilaabaa.




Markii aad dhameysid buuxinta codsiga waxaa laguu soo diraa warbixinadii aad ku buuxisay oo kooban. Markaan waxaad reebeysaa caddeyn xaqiijin ah, GDPR iyo warbixino kale oo ku saabsan bixinta kaalmada dhaqaale adigoo dariishada yar istilaab saaraaya ka dibna oggolaasho ayaad bixineysaa adigoo saxiixaaya codsigaaga waxaad riixeysaa "Signera och skicka in". Haddii aad wax ka qoomameyso waxaad taabaneysaa badhanka dib u laabashada.



si codsiga uu u noqdo mid sax ah oo dhameystiran la codsadaha waa inuu galaa oo saxiix sameeyaa. Haddii aad ku aragto wax qalad ah codsiga waxaa dib ugu celin kartaa codsaha kaasoo wax ka bedeli kara qaladaadka ka dibna mar kale ayaad saxiixeysaa.




Hadda codsigaaga waa soo gudbisay waxaadna kala socon kartaa warbixinada sawirka boggeyga. Darafka meesha waa laga raraayaa ka dib ilaa iyo inta go’aan laga soo gaaraayo.

LINDESBERGS KOMMUN




Haddii codsigaagau baahdo in la soo dhameystiro waxaa laguu soo diraa SMS ama boostada elektrooniga ah oo ku qoran waxa lagaa rabo iyo taariikhda ugu dambeyso ee aad keeneysid. Gal boggaaga ka dibna aqri waxa lagaa rabo inaa ku soo dhameystirtid, soo degso warbixinada ka dibna taabo meesha ay qorantahay dir.



Marka codigaaga uu diyaar noqdo waxaa laguu soo diraa SMS ama boostada elektrooniga ah oo laguugui sheegaayo in go'aan la gaaray waxaa kaloo ka arki kartaa boggaaga shabakada.
waxaad arkeysaa inta laguu soo oggolaaday iyo waqtiga lacagta ku soo gaareyso., waqitiga uu yahay waxaa kaloo arkeysaa sida loo soo xisaabay iyo qeyb ka mid ah diiwaankaaga. Waxaa kaloo arkeysaa haddii caawinaada dhaqaalaha laguu diiday, markaas waxaad heshay go'aan diidmo ah.




haddii diidmo lagu siiyo waxaa meesha kuugu qoran o koroon waxaa kaloo arkeysaa diiwaanka waxa kugu qoran iyo sababta laguugu diiday. Waxaa kaloo guriga laguugu soo diraa waraaqda aad ku dacwoon kartid waxaana ku qoran sidaa go'aanka uga dacwoon kartid haddii aadan qanacsaneyn. Halkaan waxaad ka aqrisan kartaa sidaa u dacwoon kartid.




Haddii uu qalad ku yimaado adeega elektarooniga ah – la xiriir gacanhayahaaga ama soo wac xiriirinta degmada oo u sharax dhibaatada waxay tahay, 0581-810 00 vx.